# MACLUUMAAD - ku saabsan taageerada masruufka

Qofki aan dakhli kiisaa isku masruufi karin ama si kale xaq ugu leh kaalmo dhaqaale. Codsiga taageerada masruufka waxaa lagu sameynayaa degmada uu qofku degganyahay. Taageerada masruufku waa kaalmo dhaqaale oo loo eegayo baahida qof ahaaneed. Guddigu wuxuu raacayaa halbeeg qaran oo waddanka oo dhan isku mid ah. Halbeegta ayaa sheegeysa inta ay noqoneyso lacagta kaalmada ah bishiiba.

Halbeegtu waxay sida soo socota ugu qeybsantahay kharashaadka qof ahaaneed iyo kharashaadka gariga ee la wadaago:

**Kharashaadka qof ahaaneed:**

- *Raashin* – Halka laga duulayo waa in qofka loo suurta geliyo in uu helo cunto kala duduwan oo nafaqo leh.
- *Dhar iyo kabo* – Kharashaadka baahida maalinlaha ah ee dharka iyo kabaha.
- *Ciyaar iyo xilli firaaqo* – Kharashaadka macquulka ah ee nashaadaadka sida tusaale ahaan akhrisashada buugaagta iyo wargeysyada, dhegeysashada muusikada, qabashada waxyaabo aad ku hawlanaatid xilliga firaaqada, tusaale ahaan isboorti.
- Halkan waxaa sidoo kale ku jira *ceymiska carruurta iyo dhallinyarada*.
- *Nadaafadda* – Waxyaabaha maalinlaha ah sida saabuun iyo daawo caday iyo timajare.

**Kharashaadka guriga ii la wadaago:**

- *Waxyaabaha la isticmaalo* – waxyaabaha hoyga lagu daryeelo iyo dharka.
- *Wargeys-maalmeed, telefoon, Lacagta TV-ga lagu bixiyo iwm* – rukumasho wargeys maalinle ah, telefoon iyo kharashaadka wadahadalka iyo ruqsad TV

**Tusaale ku aaddan waxyaabo loo arko lacago leesugu daro oo halbeegta ka baxsan:**
Kiro, ceymis guri, dhakhtar booqasho, dawo, safar shaqo, kharashaadka ururka shaqaalaha ama xubin A-kassa la aqoonsanyahay, kharashka maalinta/xilliga firaaqada iyo adeeg guri haddii aan kharash dhimid la oggolaannin, korontada guriga, kharashaad hoy oo macquul ah, ceymis guri iyo kharash macquul ah oo intarneet loogu tala galay.

## Baaritaan

Si aad wax ka qabashada arrinkaaga u fududeynsid, go'aankuna uu sax u noqdo waxaad u baahantahay in aad codsi sameysid. Codsi cusub ayaa bil kasta la sameynayaa. Macluumaadkaaga waa in aad ku xaqiijin kartaa faahfaahinno, tusaale ahaan jawaabta dakhliga, kontoraatada kirada, caddeynta dakhliga, faatuurooyin, qorshe waxqabasho oo Xafiiska shaqada ka socda iwm.

Waa in aad soo gudbisaa dhammaan dakhliga soo galay qoyska ama la sugayo in loo soo shubo. In qof kale lala degganyahay waxaa marka la sameynayo baaritaanka kaalmada dhaqaale lala simayaa in qofkaas la isqabo.

Haddii waraaqaha codsigu aysan dhammeystirneyn waxba lagama qaban karo arrinka ilaa inta la soo dhammeystirayo- ama diidmo ayaa lagu siinayaa. Haddii aad dhiibtid macluumaad khaldan ama aan dhammeystirneyn waxaa dhici karta in lagaa gaaro go’aan qaldan. Haddii kaalmo dhaqaale laguugu oggolaado si khaldan waxaa dhici karta in ay kugu waajibto in aad lacagta dib u soo celisid, sooshaalkuna wuxuu booliska u gudbin karyaa dacwo ku aaddan in khiyaano laguugu tuhunsanyahay.

FG! – Raasumaal in la haysto, tusaale ahaan wax banki kuu yaalla, sanduuq maaliyadeed, hanti ma guurto ah iyo raasumaal qaali ah wey saameyn karaan xaqa aad u leedihid taageerada masruufka.

## Mas’uuliyad

**Mas’uuliyaddeenna**

Dhammaan shaqaalaha waxaa saaran waajib sir qarin iyo in ay leeyihiin kartida aqooneed ee loo baahanyahay si, si sax ah loogu maareeyo kiiskaaga. Waxaad xaq u leedahay in shaqaalaha aad la kulmeysid ay si wanaagsan kuu qaabilaan.

**Waxaan sugi kartaa in aad heshid:**

- macluumaad ku saabsan taageerada masruufka
- in lagaa caawiyo buuxinta codsiga
- in inta arrinka gacanta lagu hayo oo dhan turjumaan laguu qabto marki aad ballan leedihid
- in muddo seddax usbuuc gudohood ah aad heshid go’aan qoraal ah oo ay la socoto warbixin ku saabsan go’aanka
- macluumaad ku saabsan sida aad go’aanka uga dacwoon kartid haddii aadan ku qanacsaneyn iyo in ka dacwooshada lagaa caawiyo

**Ma’uuliyaddaada**

Si aan meesha aad naga fileysid uga soo bixi karno waxaan u baahannahay caawimaaddaada. Waxaan kaaga baahannahay codsi dhammeystiran si aan arrinka u baari karno, haddii kale waxaan kaa dalban doonnaa in aad soo dhammeystirtid. Waxaan xitaa rabnaa in aad noo sheegtid haddii xaaladdaada dhaqaale ay is beddesho inta arrinka gacanta lagu hayo.

**Aragtiyo, dacwo iyo ammaan**

Aragtiyo, dacwo iyo ammaan waxay na siinayaan macluumaad qiimo badan si aan sida aan nahay uga sii wanaagsanaanno. Sidaas darteed waxaan aad u rabnaa in aad noo sheegtid waxa aad ka heshid waxa aan sameyneyno iyo sida aan kuu qaabileyno.

## Kharashaadka daryeelka ilkaha

Kaalmo dhaqaale oo ku aaddan daryeelka ilkaha waxaa loo oggolaan karaa **xaaladaha daryeelka ilkaha ee degdegga ah** iyo **daryeelka ilkaha ee lagama maarmaanka ah.**

**Daryeelka ilkaha ee degdegga ah,** micnaha daryeel ilko oo ay khasabtahay in markaas la sameeyo, waxaa la sameyn karaa hindise kharash la’aantiis. Taageerada masruufka gadaal

dambe ayaa Lagaaga oggolaan karaa haddii, ka dib marka la eego, aad si waafaqsan fasal 4 xaq ugu leedihid kaalmo masruuf. 1 Xeerka sooshaalka.

**Daryeel ilko oo lagama maarmaan ah** waxaa loola jeedaa daryeel ilko oo xeerarka qaar waafaqsan oo Dhakhtarkaaga ilkuhu uu macluumaad ka helyay. Inta aysan daweyntu billaaban waa in Aad Dhakhtarkaaga ilkaha weydiisataa qoraal caddeynaya kharashka ku kacaya. Marka gacan hayuhu uu helyo qoraalka caddeynaya inta ay daweyntu ku kaceyso ayaa go'aan laga gaarayaa in Laguu oggolaan karo kaalmo dhaqaale oo loogu tala galay kharashka ku baxaya daryeelka ilkaha. Weydii Dhakhtarkaaga haddii ay suurta gal tahay in aad tartiib-tartiib u bixisid iyo in aad sii hormarineysid lacagta.

Sida caadiga ah waxay taageerada masruufku ka duuleysaa xeerka lagama maarmaannimada daryeelka ilkaha sida waafaqsan xeerarkaas gaarka ah. Waxaa laga weecan karaa xeerarkaas oo keliya haddii ay jiraan sababo loo garaabi karo. Markaas waa in dhakhtarkaaga ilkuhu uu hindisaha kharashaadka ku soo bandhigaa sababahaas, iyo xitaa siyaabaha kale ee wax loo daweyn karo.

Haddii aad ka baaqaneysid ballan aad dhakhtar ilko ku ag lahayd, waa in aad waqti fiican ka hor iska joojisaa ballanta. Sooshiyaalku kaalmo lacageed kuma bixinayo kharashaadka booqasho laga baaqday.

Haddii aad beddelatid Dhakhtarka ilkaha waa in aad adigu iska bixisaa booqashada ugu horreysa, micnaha baaritaanka cusub.